



**SOMALI NATIONAL
BUREAU OF STATISTICS**
Federal Republic of Somalia

TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA JUUN 2023



Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Juun 2023 ayaa gaaray 143.72, marka la barbardhigo 143.73 bishii Maajo 2023.

Isbedel bileedka, Juun 2023, marka la barbar dhigo Maajo 2023, ayaa hoos u dhacay -0.01 boqolkiiba. Sare u kaca billaha ee ugu badan ayaa ahaa **Dharka & Kabaha (9.08 boqolkiiba)**. Sare u kaca **dharka & Kabaha** ayaa ka dhashay qiimo koror u ku yimid **Dharka (+12.82 boqolkiiba)**. Sare u kaca ugu badan waxaa ka qaybqaatay qiimaha **Dharka Dumarka (+25.64boqolkiiba)**. **ciid weynta awgeed** (Jaantuska 2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Juun 2022 iyo Juun 2023 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa sare ukacay 6.64 boqolkiiba, marka la barbardhigo 6.59 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Maajo 2022 iyo Maajo 2023.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Juun 2023 (Dec 2014 = 100)


| Tusaha Sicirka Badeecadaha, Juun 2023 | |
|--|--------|
| Tusaha bishan (Juun 2023) | 143.72 |
| Tusaha bishii hore (Juun 2023) | 143.73 |
| Tusaha sanadkii hore (Juun 2022) | 134.77 |
| Isbedelka bilaha ah boqolkiiba % | 0.01% |
| Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba % | 6.64% |

heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12billod.

Tixraca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Juun 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Juun 2023

Heerka sicir-bararka bisha Juun 2023 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Maajo 2022 iyo Juun 2023.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 6.64 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Juun 2022 iyo Juun 2023, marka labar bardhigo 6.59 boqolkiiba 12kii bilood, Maajo 2022 iyo Maajo 2023.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Juun 2023 ayaa sameeyey hoos u dhac dhan -0.01 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Juun 2023.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada**, **guryaha, biyaha**, **korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi hoos u dhacay -1.52 boqolkiiba, bishii Juun 2023 marka la barbardhigo sare u kac gaaraya -0.31 boqolkiiba bishii Maajo 2023. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu hoos u dhaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay 0.36 boqolkiiba bishii Maajo 2023. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 2.26 boqolkiiba Maajo 2023.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa sameeyey hoos u dhac bille ah oo gaaraya 0.75 boqolkiiba Juun 2023. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sameeyey sare u kac dhan 16.41 boqolkiiba Juun 2022. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah 13.88 boqolkiiba ee Maajo 2023.

Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Juun 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Juun 2023 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Tubaakada** ayaa la diiwaangaliyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 98.59 boqolkiib bishii Juun 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Qaadka (Miiraha ah) (+ 150.00 boqolkiiba).
- **Kirada Guryaha & Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 16.41 boqolkiiba bishii Juun 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Korontada, gaaska & shidaalka (+21.55 boqolkiiba). Tani ayaa timid qiimaha shidaalka oo sare u kacay awgeed +44.0 boqolkiiba.
- **Dharka & Kabaha** ayaa laga diwaan galiyey sare u kac dhan 13.97 boqolkiiba Juun 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+16.97 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka Dumarka (+26.58 boqolkiiba).
- **Isgaarsiinta Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 13.63 boqolkiiba bishii Juun 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+20.84 boqolkiiba).
- **Cafimaadka** ayaa lagu diwaan geliyey sare u kac sanadle ah 10.56 boqolkiiba, bishii Juun 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+19.81 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 9.08 boqolkiiba bishii Juun 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha adeega Gaadiidka (+32.36 boqolkiiba). Sare u kaca ayaa ka yimid agabka gawaarida dhulka (+49.21 boqolkiiba)
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diwaan galiyey sare u kac dhan 6.42 boqolkiiba Juun 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dhalada, Maacuunta & Agabka miisaska oo gaaray (+13.79 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 3.60 boqolkiiba bishii Juun 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid hoteelada (+5.70 boqolkiiba).

War bixin bileedka bisha **Juun 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia


- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 3.41 boqolkiiba Juun 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+8.91 boqolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Juun 2023 (-)

- Guud haan majirin hoos u dhac la taaban karo bishii Juun.

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB -da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Juun 2023 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Juun 2023 (+)

- **Dharka & Kabaha** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac bille ah oo dhan 9.08 boqolkiiba Juun 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (12.82 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka Dumarka (+25.64 boqolkiiba) munaasabad Ciidul adxaa awgeed.

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bisha Juun 2023 (-)

- Guud haan majirin hoos u dhac la taaban karo bishii Juun.

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Juun 2023 ee habka (COICOP)

| Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP | TSB Weight | Juun 2022 TSB | Maajo 2022 TSB | Juun 2023 TSB | % Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore | % Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan |
|---|------------|---------------|----------------|---------------|--------------------------------------|--|
| Dhamaan Qeybaha Tsb | 100.00 | 134.77 | 143.73 | 143.72 | -0.01 | 6.64 |
| Cuntada & Cabitaanada | 46.04 | 149.01 | 151.85 | 149.54 | -1.52 | 0.36 |
| Tubaakadda | 1.25 | 82.02 | 162.88 | 162.88 | 0.00 | 98.59 |
| Dharka & Kabaha | 5.03 | 147.53 | 154.14 | 168.14 | 9.08 | 13.97 |
| Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale | 23.41 | 120.08 | 138.74 | 139.78 | 0.75 | 16.41 |
| Agabka Guryaha | 2.93 | 109.53 | 116.56 | 116.56 | 0.00 | 6.42 |
| Caafimaadka | 5.00 | 161.16 | 176.45 | 178.18 | 0.98 | 10.56 |
| Gaadiidka | 3.77 | 111.13 | 120.96 | 121.22 | 0.22 | 9.08 |
| Isgaarsiinta | 2.80 | 103.03 | 117.07 | 117.07 | 0.00 | 13.63 |
| Hawo Bedeleshada & Dhaqanka | 1.00 | 103.85 | 103.85 | 104.30 | 0.43 | 0.43 |
| Tacsiinta | 4.00 | 109.11 | 109.11 | 109.11 | 0.00 | 0.00 |
| Maqaayadaha & Hoteelada | 2.00 | 140.72 | 145.78 | 145.78 | 0.00 | 3.60 |
| Alaabaha Yaryar & Adeegyada | 2.77 | 110.27 | 114.03 | 114.03 | 0.00 | 3.41 |

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Juulay, 2023 waxaa la baahin doonaa 15 Agoosto, 2023. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Juun 2023 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB-da

qeybaha ka qeybqata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Juun 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia